

# Interrupted Aortic Arch

Dhammeys La'aanta Halbowlaha Dhiigga Qeybiya




**Wadne Caadi ah**



Ogeysiis:





© 2012 The Children's Heart Clinic

## **Dhammeys La'aanta Halbowlaha Dhiigga Qeybiya**
Interrupted Aortic Arch (IAA)

Interrupted aortic arch (Dhammeys la'aanta halbowlaha dhiigga qeybiya ama IAA) waa nooc ka mid ah waayidda qeyb ka mid ah halbowlaha dhiigga qeybiya (xirmid) ama qeyb ayaa ka maqan. IAA waxaa la arkaa marka uu jiro patent ductus arteriosus (xidid dheeraad ah ama PDA) iyo septal ventricular defects (duleelka darbiga wadnaha ama VSD) in ka badan 90% qiyaas ahaan. Daboolka dhiiga ee xumaada, sameyska xumaada ee daboolka liifadda ah, dhiigga isku furma ee halbowlaha weyn iyo sambabka, ama dhuubashada halbowlaha ayaa lala xiriiriyaa cilladda IAA. Xanuunka DiGeorge oo aafeeya wadnaha waalidka ayaa laga dhaxlaa oo waa mid ka badan 15%. IAA waa xanuun ah naadir, oo 1% ayuu ka yahay cilladaha wadnaha ee lagu dhasho.

**Noocyada:**

- Nooca A: Waxaa la arkaa 30% kiisas ah IAA. Xanuunkan oo ah dhammeys la'aan ka fog halbowlaha bidix ee kalxanta.
- Nooca B: Waxaa la arkaa 43% kiisas ah IAA. Dhibaatadan waxaa lagu arkaa inta u dhaxaysa halbowleyaasha bidixe ee dhiigga iyo kalxanta. Inta badan, halbowlaha kalxanta midig caadi ma aha, oo si aan caadi ahayn ayuu uga soo baxaa halbowlaha dhiigga qeybiya. 50% ilmaha qaba Nooca B IAA waxay qabaan xanuunka DiGeorge.
- Nooca C: Waxaa lagu arkaa 17% ka mid ah ilmaha qaba IAA. Dhibaatadan waxaa lagu arkaa inta u dhaxaysa halbowleyaasha bidixe iyo kan midige ee dhiigga.

**Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:**

- Maalmaha ugu horreeya ee nolosha, dhallaanka waxaa ku dhacda dhibaato ah hawamareenka, garaaca wadnaha oo liita iyo dheecaan kale, midabka oo doorsooma (midab buluug ah). Xaalado dhif ah, xididka dhiigga ee ilmaha uurjiifka ah ayaa sii furnaada muddo dheer, oo mar dambe ayaa la ogaadaa.
- Shaqa-hakinta wadnaha.

**Cilladsheegid:**

- Raajada Xabadka Wadne-barar (wadnaha oo weynaada), koror ah calaamadaha xididdada sambabka iyo cabbur/barar ah sambabka ayaa la arkaa.
- EKG: Waxaa muujin kartaa unugweynaad ah qalbaca midig (weynaansho) xaaladaha qaarkood.
- Uultarasawnka wadnaha: Cilladsheegid.

**Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:**

- Daaweynta Prostaglandin E (Xinjirowga dhiigga ama PGE) waa in loogu bilaabo sida ugu dhakhso badan dhalashada ka dib ama helitaan ah in la ilaaliyo xididka dheeraadka ah.
- Baaritaan ah hidderaaca xanuunka DiGeorge ayaa la sameynayaa wax yar ka dib dhalashada.
- Tuubagelin iyo daawada garaacista wadnaha ayaa loo baahan doonaa qalliinka ka hor.
- Dhallaanka waa qalliinka loo sameeyo wax yar ka dib dhalashada/helitaanka xanuunka (eeg Ha-gaajinta dhammeys la'aanta halbowlaha dhiigga qeybiya).
- Bakteeriyada infakshanka wadnaha ka hor inta aan la sameyn qalliinka dhakhtarka ilkaha KELIYA ilmaha laga beddelayo waalwalaha, xididka xun oo lagu sameeyo hagaajin macmal ah, ama in la hagaajin waayo wadnaha uu ku dhacay doorsoonka midabka.
- La-socosho ah daaweynta wadnaha oo joogto ah ayaa khasab noqon doonta.

**Natiijooyinka Mustaqbalka-Fog:**

- Dhiigkar ayaa imaan kara qalliinka ka dib, oo waa in lagu daawo lagu tacaalo.
- Guud ahaan, korriinka iyo koboca maskxeed caadi ayey noqdaan marka uusan jirin xanuun ah wadnaha oo lagu dhasho ama xanuun kale oo weheliya oo ah sida DiGeorge.


© 2012 The Children’s Heart Clinic